City of Boston
Inspectional Services

SIDEE LOO HELI KARAA SOO-SAARISTA RUQSADDAADA EE NOOCA GAABAN?

Waxaad wajahaysaa dhibaatada ah "Diiwaan la'aanta Deganaanshaha" (No Record of Occupancy) oo ku saabsan Waaxda Adeegyada Kormeerka (ISD). Si aad ugu sii socoto arrimaha ruqsadahaaga, waxaad u baahan tahay inaad qeexdo "aqoonsiga" guriga.

Si aan kaaga caawinno arrintan, fadlan u isticmaal liis-hubinta fudud ee soo socota si aad ugu dhex socoto bogga internetka, una hesho ruqsaddaada.

- **Helitaanka Bogga:** Tag boston.gov/isd oo guji "Apply for a Permit"
- **Soo gal/Diiwaangeli:** Ku samee koonto iimaylkaga ama gal haddii aad hore mid leedahay
- **Nooca Ruqsadda:** Dooro “Foomka Dheer/Wax-ka-beddel/Beddelka Isticmaalka Goobta”
- **Nooca Shaqada:** Dooro "Ma jiro diiwaan muujinaya deggenaansho”
- **Qiimo:** Geli “1” (adigoon ku darin calaamadda doolarka ama hakadyo)
- **Qeexitaan:** Si cad u sheeg isticmaalka hantida
    - *Tusaale:* “Xaqiiji in loo isticmaalo hoy ahaan qoysas tiradoodu tahay tirada"
    - *Fiiro gaar ah:* Hubi inaad ku darto magaca mulkiilaha hantida, lambarka taleefanka, iyo iimaylka
- **Lifaaqyo:** Looma baahna inaad codsiga ku lifaaqdo wax dukumeenti ah

MAXAA XIGA?

1. **Lambarka ALT:** Waxaad heli doontaa lambarka ruqsadda oo ku bilaabmaya ALT.

2. **Dib-u-eegista Safka:** Dib-u-eegista maamulku way bilaaban doontaa, waxaana loo gudbin doonaa qaybta Qorsheynta iyo Qaybinta Aagagga.

3. **Lacag-bixin:** Bixi khidmadda oggolaanshaha ALT, dabadeedna waxaa laguu soo saari doonaa oggolaanshaha Foomka Gaaban.

4. **Kormeer:** Ballanso kormeerkaaga adigoo isticmaalaya bogga oggolaanshaha.

TALO WAXY TARAYSA OO KU SAABSAN BOOQASHOYINKA

Hubi in dhammaan qaybaha ay u fududahay kormeeraha dhismaha inuu galo. Waxay hubin doonaan in qaab-dhismeedka oo ay ku jiraan jikooyinka, musqulaha, meelaha laga soo galo ee gaarka ah, iyo mitirrada adeegyada uu waafaqsan yahay tirada qoysaska aad sheeganayso.